

Hab kale oo lagu dhigan karo waxbarashada dugsiiga sare

Ayadoo ay jirto 18ka barnaamij qarameed ayaa haddana waxaa jira barnaamijka bakaloorka ee caalamiga (IB), koorasyada waxbarashada caarada fiiqan, koorasyada tababarka(barnaamijyada xirfadaha) ,koorasyada waxbarashda ciyaaraha ,koorasyada tababarka,koorasyada waxbarasho ee dalkoo dhan laga dalban karo iyo waxa loo yaqaan noocyada gaarka ah. Halkan waxaad ka akhrisan kartaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha kala duwan.



KOORASYADA TABABARKA XIRFADAH(A(LÄRLINGSUT-BILDNING)

Waa macquul in qofku dhigto barnaamij xirfadeed sida tababarka xirfadaha ee dugsiiga sare. Waxaad heleysa isla aqoonta ay helayaan ardayda dhigata farsamada ee dugsiiga.

CIYAARAH & ISBOORTIGA (IDROTT)

Waxaa jira fursad uu qofku isku wada kabi karo waxbarashada dugsiiga sare iyo isboortiga ee heerka sare.

QAABABKA GAARKA AH (SÄRSKILDA VARIANTER)

Nooca gaarka ah ee waxbarasho waa waxbarasho dugsi sare ee qayb ka mid ah ama dhammaan takhasuska waxbarashda ama barnaamijka ee uu ka weecanayo barnaamijka waxbarasho ee qarameed.

KOORASYADA WAXBARASHADA CAARADA FIIQAN (SPETSUTBILDNING)

Aqoon qoto dheer oo aad loogu jilcinayo maadooyinka gaarka u ah waxbarashda.

BARNAAMIJKA BAKALOR DIBLOOMA EE CAALAMIGA (IB)

IB waa barnaamijka isu diyaarinta dugsiiga sare ee leh imtixaan caalami oo la aqoonsan yahay. Waxay hawsha waxbariddu inta ugu badan ku baxdaa afka ingiriiska.

FARSAMADA DIYAARADAH(A)

Waxbarashada farsamada diyaaradaha waa tababar-ka,koorasyada waxbarasho farsamadeed ee dalkoo dhan laga dalban karo ee loogu talo galay adigaaga raba inaad u shaqeyso si farsamoyaqaanka diyaaradaha ama diyaaradaha qumaatiga u duula (heelikoobtar).

BARASHADA FARSAMADA BADDA

Waxbarashada farsamada badda waa kooraska waxbarashada xirfadaha ee dalkoo dhan laga dalban karo ee loogu talo galay dadka raba iney ka shaqeeyaan tusaale ahaan farsamada badda iyo farsamada nadaamka cilmiga badda.

WAXBARASHADA BADMAAXNIMADA (SJÖFARTSUT-BILDNING)

Waxbarashad badmaaxnimada waa kooraska waxbarashada xirfadaha ee dalkoo dhan laga dalban karo ee loogu talo galay dadka raba iney ka shaqeeyaan badmaax,farsamoyaqaanka mishiinka ama korontoyaqaanka markabka.

WAXBARASHADA FARSAMADA TAREENKA (TÅGTEKNIKUTBILDNING)

Waxbarashada farsamada tareenka waa waxbarashada xirfadahada ee dalka oo dhan laga dalban karo ee loogu talo galay dadka raba iney ka shaqeeyaan farsamada tareenka ama farsamayaqaanka dayactirka.

GANACSIGA DADKA SAAMISKA (SAMISKA NÄRINGAR)

Waxbarashada dadka saamiska waa waxbarashada xirfadahada ee dalka oo dhan laga dalban karo ee loogu talo galay dadka raba iney ka shaqeeyaan dhaqashada cawsha , farsamada gacanta ee saamiga ama wargeliyaha dhinaca dabeecadda,dhaqanka- iyo cunnada ee ganacsiga dalxiiska.

WAXBARASHADA XIRFADDA QOOB KA CIYAARKA (YRKESDANSARUTBILDNING)

Waxbarashada xirfadda qoob ka ciyaarka waa waxbarashada xirfadahada ee dalka oo dhan laga dalban karo ee loogu talo galay dadka raba iney ka shaqeeyaan qoob ka ciyaarka waayadii hore ama kuwa casriga ee maanta jira.